BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

Tallaalka (HUMAN Papillomavirus) HPV Gardasil®

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Ka eeg www.immunize.org/vis.

Hojas de Información Sobre Vacunas están disponibles en Español y en muchos otros idiomas. Booqo http://www.immunize.org/vis

1 Waa maxay HPV?

Genital **human papillomavirus (HPV)** waa fayraska ugu badan ee isku-tagga (galmada) la iskugu gudbiyo Maraykanka. In ka badan kala bar ragga iyo dumarka galmo ahaan firfircoon waxa ku dhaca HPV mar noloshooda ka mida.

Illaa 20 milyan oo Maryankan ah ayuu hadda hayaa, illaa 6 milyan in ka badana sannadkii ayuu ku dhacaa. HPV wuxuu badanaa ku faafaa isku-tagga (galmada).

Badanka infakshannada HPV ma keenaan wax astaamo ah, iyagaana iska baaba'a. Laakiin HPV wuxuu ku keeni karaa **kansarka ilma-galeenka** haweenka. Kansarka ilma-galeenku waa sababta ugu sidata ee 2aad u dhimashada kansarka ee dumarka adduunka oo idil. Maraykanka, qiyaastii 12,000 oo haween ah ayaa qaada kansarka ilma-galeenka sannadkii oo waxa la filayaa inay u dhintaan 4,000.

HPV waxa sidoo kale la socda kansarro dhawr ah oon aad sidaa loo aqoon, sida kansarka xubinta taranka iyo agagaarihiisa ee haweenka ku dhaca, iyo kaansarka futada iyo cunaha (xagga dambe ee cunaha, oo uu ku jiro salka carabka iyo hilib-dalqaha) oo ah ragga iyo haweenka labadaba. Wuxuu sidoo kale keenaa finanka xubinta taranka iyo finan cunaha ah.

Ma laha daawo infakshanka HPV, laakiin qaar ka mida dhibaatooyinka uu keeno waa la daawayn karaa.

2 Tallaalka HPV Maxaa la iskaga tallaalayaa?

Tallaalka aad qaadaneyso waa mid ka mid ah labada tallaal ee HPV kuwaas oo la bixin karo si looga hortago HPV. Waxa la siin karaa labka iyo dheddigga.

Tallaalkan ayaa ka hortagi kara inta ugu badan xaaladaha kaansarka makaanka afkiisa ee haweenka ku dhaca, haddii la siiyo kahor intuuna ku dhicin. Wuxuu sidoo kale kahortagi karaa kansarka siilka iyo agagaarkiisa dheddigga kaga dhaca, iyo finanka xubinta taranka iyo kansarka dabada kaga dhaca labadoodaba labka iyo dheddiggaba.

Badbaadinta laga helo tallaalka HPV waxa la rajaynayaa inay muddo dheer jirto. Laakiin tallaalku beddel uma aha baadhista kansarka afka ilma-galeenka. Haweenku waa inay wali helaan baadhista Pap ee joogtada ah.

3 Ayaa la rabaa inay helaan tallaalkan HPV oo waana goorma?

Tallaalka HPV waxa loo bixiyaa 3 xidhmo qiyaas ama taxane

Qiyaasta 1-aad	Hadda
Qiyaasta 2-aad	1 illaa 2 bilood kadib qiyaasta 1-aad
Qiyaasta 3-aad	6 bilood kadib qiyaasta 1-aad

Qiyaas dheeraad ah (oo xoojin ah) laguma talinayo.

Tallaalka Caadiga ah

- Tallaalka HPV waxa lagula taliyaa hablaha iyo wiilasha **11 ama 12 sano da'doodu tahay.** Waxa la siin *karaa* laga bilaabo 9 jir.

Maxaa tallaalka HPV loogula taliyaa markay yihiin 11 ama 12 sano jir?

Infekshinka HPV si fudud ayaa loo qaadi karaa, xitaa marka la leeyahay kaliya hal rafiiq oo isku-tag (galmo). Taasi waa sababta ay muhiimka u tahay in la qaato tallaalka HPV ka hor intuusan isku-taggu (galmadu) Waliba, dareen ka celinta tallaalku wuxuu ka wanaagsan yahay marka da'dan la yahay marka loo eego da'aha ka waaweyn.

Tallaalka Dabaqabataynta

Tallaalkan waxa lagula talinayaa dadka soo socda ee aan dhammaystiran taxanaha 3-qiyaas daawo tallaal:

- Dheddiga ah 13 illaa 26 sano da'doodu tahay.
- Labka 13 illaa 21 sano da'doodu tahay.

Tallaalkan ayaa la siin *karaa* ragga 22 illaa 26 da'doodu tahay ee aan dhammaystiran taxanaha 3-qiyaas daawo.

Wax a*lagula talinayaa* ragga illaa 26 ee ragga ay isku-tagaan ama difaaca jirkoodu diciif ku noqday sabab ahaan infekshinka HIV, jirrooyin kale, ama daawooyinkaba.

Tallaalka HPV waxa la siin karaa xilli la mid ah sida tallaallada kale.

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

4 Dadka qaar waa inayna helin tallaalka HPV ama waa inay sugaan.

- Ciddii mar uun ku yeelatay falgal dareen-celin ama xasaasiyad nafta halis u ah wax uu ka kooban yahay tallaalka HPV ama qiyaas daawo hore oo ahayd tallaalka HPV, waa inayna qaadan tallaalka. tallaalka. U sheeg dhakhtarka haddii qofka la tallaalayo uu u leeyahay wax xasaasiyad daran ah, oo ay ku jirto xasaasiyadda yiista (yeast).
- Tallaalka HPV lagulama talinyo haweenka uurka leh. Hase yeeshee, qaadashada tallaalka HPV inta uurka la leeyahay sabab u noqon mayso inaad ku tashato joojinta uurka. Haweenka naaska nuujinayaa ayaa laga yaaba inay qaataan tallaalka.

  Haweenay kasta oo ogaata inay uur lahayd markay qaadatay tallaalkan HPV waxa lagu dhiirigalinayaa inay soo-saaraha HPV kala xiriirto diiwangalinta uurka oo ah taleefanka 800-986-8999. Tani waxay naga caawin doontaa inaan ogaano waxyaabo badan oo ku saabsan sida haween uurka lihi uga dareen-celiyaan tallaalkan.
- Dadka si sahlan u jirran marka siin ah qiyaas tallaalka HPV loo qorsheynayo wali waa la tallaali karaa. Dadka leh xanuun dhexe ama daran waa inay sugaan illaa ay soo roonaanayaan.

5 Waa maxay halista ka iman karta tallaalka?

Tallaalkan HPV waxa laga isticmaalayey Maraykanka iyo adduunka oo dhan lix sano waxayna ahaayeen kuwo si aad ah badbaado u leh.

Si kastaba ha ahaato ee, daawo kastaa waxay sababi kartaa dhib halis ah, sida dareen-celin ama xasaasiyad daran. Halista tallaal keenaya dhaawac halis ah, ama geeri, aad ayuu u yar yahay.

Diidmooyin ama ama xasaasiyado halis nolosha galiyaa oo ka imanaya tallaalka aad ayey naadir u yihiin. Hadday dhacaan, waxay socdaan gudahooda daqiiqado yar illaa sacaado yar kadib tallaalka.

Dhibaatooyin dhawr ah **oo khafiif ah** illaa **dhexdhexaad ah** ayaa lagu yaqaan inay ka yimaadaan tallaalka HPV. Kuwani in badan ma socdaan iyagaana iska taga.

- Dareen-celin ah gacanta meesha tallaalka laga qaatay:
  - Xanuun (qiyaastii 8 qof 10-kii qofba)
  - Casaan ama barar (qiyastii 1 qof 4-tii qofba)
- Qandho (Xummad):
  - Dhexe (100° F) (qiyaastii 1 qof 10-kii qofba)
  - Dhexdhexaad (102° F) (qiyaastii 1 qof 65-tii qofba)
- Dhibaatooyinka kale:
  -Madax-xanuun (qiyaastii 1 qof 3-dii qofba)
- Miyirbeelid: Suuxdin kooban iyo astaamo la xidhiidhana (sida dhaqdhaqaqyo gundhin leh gariir) ayaa dhici karaa kadib habraac ama hawlgal caafimaad oo kasta, oo uu ku jiro tallaalku. Fadhiga ama jiifsadka illaa 15 daqiiqo kadib tallaalka wuxuu caawin karaa kahortagga suuxdinta iyo dhaawacyada ay keento dhicitaanku. U sheeg dhakhtarkaaga haddii bukaanku uu dawakhsan yahay, ama araggiisu isbeddelayo ama dhagahiisa wax u shanqadhayaan.Sida tallaalada kale oo dhan, tallaalka HPV waxa lagu sii wadi doonaa in lala socdo dhibaatooyinka aan caadiga ahayn ama daran.

6 Maxaa la samaynayaa haddiiba ay jirto dareen-celin dhedhexaad ah ama daran?

Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?

- Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida xummad badan ama dhaqanka qofka oo isbeddela. Calaamadaha halista ah ee dhibaatada xasaasiyada daran waxaa ka mid noqon kara neefta oo ku qabata, xabeebasho ama hiinraag, furuuruc, midabka qofka oo cawlnaada, wadne garaac badan ama dawakhsanaan.

Maxaan sameeyaa?

- **Wac** dhakhtar, ama qofka dhakhtarka u gee isla-markiiba.
- **U sheeg** dhakhtarkaaga waxa dhacay, taariikhda iyo waqtiga ay dhacday, iyo markii tallaalka la qaatay.
- **Weydiiso** dhakhtarka, kalkaaliyaha, ama waaxda caafimaadka inay ka warbixiyaan dareen-celinta iyaga oo buuxinaya warqadda Dhacdada Waxyeelalda Tallaalka Warqadda Nidaamka Ka warbixinta (VAERS). Ama waxaad ku xereyan kartaa warbixintan websaaydka VAERS ee ku yaal **www.vaers.hhs.gov**, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

VAERS ma bixiso talo caafimaad.

7 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (National Vaccine Injury Compensation Program)

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (VICP) waxaa la abuuray badhtameeyihii sannadkii 1986.

Dadka rumaysan inuu tallaal dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyagoo wacaya **1-800-338-2382** ama booqanaya websaaydka VICP **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**.

8 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan u ogaan karaa?

- Weydii dhakhtarkaaga. Waxay ku siin karaan xirmo qoraal oo ku saabsan tallaalka ama kugula talin karaan ilo kale oo aad macluumaad ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka xaafadda ama gobolkaaga.
- La Xidhiidh Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC):
  - Waxaad wacdaa **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama Waxaad booqataa bogga internetka ee CDC **www.cdc.gov/vaccines**

Vaccine Information Statement (Interim)
HPV Vaccine (Gardasil)
2/22/2012 Somali
42 U.S.C. § 300aa-26
Translation provided by the Immunization Action Coalition